



DISTRICT196

One District. Infinite Possibilities.

Goobaha caafimaadka talaalka dib ugu laabashada dugsig ardayda u diyaarsan – Agoosto/Sebteembar 2022

District 196 waxay Homeland Health ka kaashanaysaa sidii ay ardayda ugu diyaarin lahayd goobo caafimaad oo laga helo talaalka dib ugu laabashada dugsiga laga bilaabo Agoosto 24. Ka qaybqaadashada goobahaan caafimaadku waa mutadawacnimo, ayada oo ujeedka laga leeyahay uu yahay in ardayda loo dhammaystiro talaaladooda.

Si ay iskaga diiwaangeliyaan daryeelka carruurta, barnaamijyada carruurnimada hore iyo iskuulka Minnesota, waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah waa inay muujiyaan in ilmahoodu ay qaateen tallaalka looga baahan yahay da' ahaan ama fayl sharciyeed oo muujinaya inay yihiin kuwo laga dhaafay tallaalka. Waalidiintu way codsan karaan ka-dhaafitaan sababo caafimaadeed la xiriiira oo uu saxeexayo daryeel bixiyaha caafimaad ama diidmo diimeed/dhaqameed oo uu saxeexay waalid ama ilaaliye oo nootaayadana ka diiwaangashan. Macluumaadkan waa inuu ku jiraa faylka kalkaalayaha caafimaadka ee dugsiga kahor maalinta koowaad ee dugsiga.

Dhammaan talaalada dugsiga ee la iska rabo, oo uu kujiro tallaalka COVID-19, ayaa laga heli doonaa dhacdadaan. In balan la qabsado muhiim ma ahan. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan talaalada, bookho bogga websaytka Health Services, www.district196.org/services/health-services/immunizations

- **Agoosto 24, 4:30-7:30 fiidnimo.**
Apple Valley High School, 14450 Hayes Road, Apple Valley
- **Agoosto 29, 3:30-6:30 maqribnimo.**
Valley Middle School, 900 Garden View Drive, Apple Valley
- **Agoosto 31, 10 subaxnimo-12 duhurnimo.**
Oak Ridge Elementary School, 4350 Johnny Cake Ridge Road, Eagan
- **Agoosto 31, 1-3 galabnimo.**
Echo Park Elementary School, 14100 County Road 11, Burnsville
- **Agoosto 31, 4-6:30 maqribnimo.**
Cedar Park Elementary School, 7500 Whitney Drive, Apple Valley
- **Sebteembar 1, 10 subaxnimo-12 duhurnimo.**
Cedar Park Elementary School, 7500 Whitney Drive, Apple Valley
- **Sebteembar 1, 1-3 galabnimo.**
Echo Park Elementary School, 14100 County Road 11, Burnsville
- **Sebteembar 1, 4-6:30 maqribnimo.**
Oak Ridge Elementary School, 4350 Johnny Cake Ridge Road, Eagan

###